# Heerarka Tayada Waxbarashada Loo Dhan Yahay

## Xeerka 1 Cusboonaysiinta Kooxda Shaqada

Xagaaga 2011

# Waa ayo Kooxda Shaqada ee Xeerka 1?

Sannadka 2019, Kooxda Shaqada ee Xeerka 1 (sidoo kale loo yaqaan Kooxda Shaqada ee Daraasaadka Qowmiyada iyo Sinnaanta Bulshada) waxaa sameeyay sharciga Vermont. Kooxdan Shaqada leh waxay ka kooban yihiin 23 qof oo ka kala socda qaybaha kala duwan ee dawladda gobolka, ururada waxbarashada, iyo xubnaha bulshada, oo ay ku jiraan ardayda dugsiga sare, kuwaas oo jecel waxbarashada.

# Maxay Kooxda Shaqadu ka shaqaynaysaa?

**Qaybta I (Dayrta 2021 ilaa hadda)**

Waxay ka shaqeeyeen dib u eegista siyaasadaha iyo xeerarka dawladda ee saameeya manhajka iyo guusha ardayga. Waxay doorteen inay dib u eegis ku sameeyaan xeerka Guddiga Gobolka ee loo yaqaan Heerarka Tayada Waxbarashada Vermont waxayna diyaarinayeen talooyinka cusboonaysiinta sharcigan ee Guddiga Waxbarashada Gobolka. Bishii Abriil 2022, waxay soo gabagabeeyeen oo soo gudbiyeen talooyinkooda.

**Qaybta II (2022-2023)**

Dabayaaqada sanadkan, waxay u gudbi doonaan inay dib u eegis ku sameeyaan halbeegyada akadeemiyada gobolka (sida xisaabta ama halbeegyada cilmiga bulshada) oo ay tilmaamaan siyaabaha heerarkani ay si wanagsan ugu matali karaan taariikhda, aragtida, iyo waaya aragnimada kooxaha dhaqan ahaan aan la soo bandhigin.

# Wax badan oo ku saabsan Cusboonaysiinta Heerarka Tayada Waxbarashada

*Heerarka Tayada Waxbarashada Vermont* waxay u dhaqmaan sidii hage ballaadhan, oo muujinaya qiyamka muhiimka ah ee dugsiyadeenna iyo siinta jihaynta degmooyinka dugsi marka ay horumariyaan manhajkooda oo ay doortaan agabkooda. Tan iyo deyrtii 2021, Kooxda Shaqaaluhu waxay la hadlaysay xubnaha bulshada guud ahaan VT si ay u helaan jawaab celin ku saabsan waxa muhiimka ah, iyagoo ka shaqaynaya sidii loo cusboonaysiin lahaa heerarka si loo hubiyo inay sameeyaan kuwan soo socda (wax badan ka baro dulmarkan iyo qodoba looga hadley):

Horumarinta fikirka muhiimka ah ee ku xeeran taariikhda, wax ku biirinta, iyo fikradaha kooxo badan oo qowmiyado iyo bulsheed kala duwan

Ku dhiiri geli ardayda inay sahamiyaan su'aalaha ku saabsan aqoonsiga qowmiyadeed iyo bulsho iyo sidoo kale arrimaha ku saabsan sinnaanta iyo cunsuriyadda

Sii boosas soo dhaweyn ah dhammaan ardayda

U samee dariiqooyin loogu talagalay qoysaska iyo ardayda inay ka hadlaan waayo-aragnimadooda la xiriirta jinsiyadda, qowmiyadda, ama aqoonsiga kooxda bulshada ee dugsiga

# Maxaad Qaban Kartaa

Kooxda Shaqaaluhu waxay hore ugu soo bandhigeen talooyinkooda Guddiga Waxbarashada Gobolka Vermont. Xagaaga iyo dayrta Gudoonka Gobolku waxa ka helayaa jawaab celin xubnaha bulshada sidaada oo kale ah oo ku saabsan talooyinka.

Waxaa jira siyaabo badan oo aad uga qayb qaadan karto ( Ballanqaadka Waxqabad) :

- Si guud u taageer
- Kala hadal Guddiga Waxbarashada Gobolka
- Ka qaybgal kulan xogta si aad wax badan u
- Ku biir Edu. Guddiga Qabanqaabada
- Caawi telefoon iyo bangiga qoraalka
- La wadaag sheekadaada ku saabsan sababta

barato ay tani muhiim u tahay

## Nala xiriir!

U dir iimayl Iskuduwaha Isbahaysiga Cadaalada Waxbarashada, Alyssa Chen

alyssa.edjvt@gmail.com

Isdiiwaangeli si aad tallaabo u qaaddo adiga oo saxeexaya ( Ballanqaadka Waxqabad) !